

WAALID/ DARYEELBIXIYAHA / WARQADDA OGGOLAANSHAHA IYO MACLUUMAADKA

Dabeecadaha Ardayga 2022 ee Xog ururinta Dugsiyedka

Waalidka / Daryeelbixiyaha / Masuulka Qaaliga ah

Warqadan ayaa ah in lagu wargaliyo waxa ku saabsan Dabeecadaha Ardayga ee 2022 (AtoSS), oo ilmahaaga lagu casuumay inuu kaqeybqaato.

Ku saabsan xog ururinta

Waxaan u qiimeyneynaa codka ardayga qaabka lagu hormarinayo kaqeybgalka ardayga, wanaagsanaanta iyo waxbarida tayada leh waxaana sameyneynaa sahan si aan u ogaano waxa cunugaada ka qabo dugsigaaga.

AtoSS waa xog ururinta sanadlaha ah ee ardayga waxaana bixiya Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka si looga caawiyo dugsiga cunugaaga si helo fahamka fikradaha ardayda iyo waayo aragnimada dugsiga. Ardayda waxaa wax laga weydiin doonaa wax ku saabsan fikradahooda iyo dareemahooda la xiriira dugsigooda, waxbarashadooda, facooda iyo xiriirada qoyskooda, adkeysigooda, cagogulayntooda, caafimaadkooda dhimirka, iyo faydaqabkooda, jimicsiga jirka, iyo nololsha guud.

Sannadkan, AtoSS waxaa lagu qaban doonaa iskuulkaaga xiligaas 30th of May – 10th of June.

Waa maxay faa'iidooyinka?

Khibradeenna, dhallinyartu waxay ku raaxaystaan inay hadalkooda yeeshaan. Waxaan soo wadnay xog ururinta kan mudo ku dhow 20 sano waana mid aad u qiimo badan oo ka caawisay iskuulada inay fahmaan aragtida ardayda. Iskuulkaaga wuxuu u isticmaali doonaa natiijooyinka xog ururintaka inuu qorsheeyo barnaamijyada iyo waxqabadyada si loo wanaajiyo waayo aragnimada iskuulka ee canugaaga.

Waa maxay khataraha?

In kasta oo aynaan rajeyneynin halista badan ee kaqeybgalka, ardayda qaar ayaa laga yaabaa inay u arkaan qaar ka mid ah su'aalaha xog ururinta mid shaqsiyadeed oo xasaasi ah. Haddii aad ogolaato in ilmahaaga kaqeybqaato, weli way u furan yihiin inay ka boodaan su'aalaha ama ay ka noqdaan marxalad kasta haddii xog ururinta ka xanaajiyo ama ku dhibtoonayo.

Sahankan waxaa ansixiyay Gudiga Anshaxa Cilmi Baadhista Aadanaha. Su'aalaha waxaa laga soo doortay qalabyada xog ururinta saxda ah ee laga isticmaalay Australia iyo duniadda, waa kuwo ku saleysan-awood, waxaana loogu talagalay heerka kooxda sanad walba.

Muxuu ilmahaaga laga codsan doonaa inuu sameeyo?

Cunugaaga waxaa lagu casumi doonaa inuu ku buuxiyo xog ururinta **online-ka inta lagu jiro waqtiga fasalka** iyada oo la isticmaalayo ujeedo ku dhisan qalabka xog ururinta online-ka oo ammaan. Waxaa muhiim ah in la ogaado inaanann sinnaba "u tijaabinayn" ilmahaaga. Fadlan ogow:

- Kaqeybgalka ardayda ee xog ururinta waa mid ikhtiyaari ah ardayduna way ka noqon karaan markay doonaan.
- Xog ururinta waxay qaadan doontaa 20-45 daqiiqo si loo buuxiyo.

Sidee looga taxadari karaa sirta canugeeyga?

Ilmahaaga waxaa la siin doonaa login u gaar ah oo uu ku dhammaystiro xog ururinta macalinka. Soo galida ardaygu waa aqoonsi loo qoondeeyay oo loo isticmaali karo in lagu xiro xogta ujeedooyinka tirakoobka iyo cilmi baarista kaliya. Xog shaqsiyan lagu aqoonsan karo laguma qori doono feylka

jawaabta xog ururinta. Tani waxay hubinaysaa in qarsoodiga jawaabaha ilmahaaga la ilaaliyo wakhti kasta.

Sidee loo soo sheegayaa natiijooyinka?

Natiijooyinka xog ururinta waxaa dib loogu soo sheegi doonaa iskuulka qaab isku darka ah inta lagu jiro muddada daraasadda. Dhammaan xogta xog ururinta ee lagu diyaariyey warbixinnada waxaa loogu talagalay kooxaha ardayda oo keliya si aan loo aqoonsan karin arday gaar ah. Sharciyada xakamaynta xogta waxaa loo isticmaalaa iskuulada ay ku yar yihiin tirada ardayda sanadkiiba.

iskuulkaga waxaa laga yaabaa inuu la wadaago natiijooyinka xog ururinta waalidiinta, dukumiintiyada sida Warbixinta Sannadlaha ah ee iskuulka.

Ikhtiyaarrada kaqeybgalka

Ka qeybgalista xog ururinta waa **mutadawacnimo**. Haddii **aadan rabin** inuu cunugaaga sameeyo xog ururinta, fadlan iimayl kugu soo sheeg dugsigaaga: edgars.creek.ps@education.vic.gov.au. Fadlan samee ka hor 24th of May, inta aadan sheegin inaad rabto inaad rabin inuu cunugaaga ka qeybgalo, oo ay la socoto magacadooda iyo heerka sanadka.

Haddii dugsigaaga uusan ka helin emaylka Diidmada Oggolaanshaha adigu ka hor taariikhda bilowga xog ururinta ee lagu xusay warqaddan gudaheeda, waxay ka dhigan tahay inaad siiso oggolaanshahaaga inuu ilmahaagu ka qaybqaato Daraasadda 2022 ee Dabeecada Iskulk.

Koobi ka mid ah ra'yi ururinta aan weydiisaneyno cunugaaga inuu dhameystiro ayaa laga heli karaa dugsiga ilmahaaga. Fadlan la xiriir xafiiska maamulka haddii aad jeclaan lahayd inaad aragto xog ururinta ka hor intaadan gaarin go'aankaaga ku saabsan haddii aad jeclaan lahayd inuu ilmahaagu ka qaybqaato iyo in kale.

Haddii aad jaclaan laheyd macluumaad badan, fadlan la hadal macalinka cunugaaga, ama ka la xiriir Waaxda school.surveys@education.vic.gov.au.

Daacadnimaada

Waaxda Waxbarashada iyo Tababarka ee Victooriyadeed